

Waa maxay sharciga sunta ee Massachusetts?

- Sharciga sunta ee Massachusetts wuxuu ilaaliyaa xuquuqda cunugga uu u helo guri ka maran sunta.
- Sharciga sunta wuxuu u baahan yahay in laga saaro ama la daboolo wixii khatar ah ee sunta riinjiga ku keena guri kasta oo la dhisay ka hor 1978 halkaas oo uu ku noolyahay cunug ka yar 6 sano.
- Milkiileyaasha guriga iyo kireystayaasha labaduba waxey mas'uul kayihiin inay u hoggaansamaan Sharciga sunta. Waxaa looga baahan yahay inay guriga ka dhigaan mid aan lahayn sun haddii uu jiro cunug ka yar yahay 6 sano oo halkaas ku nool.

Milkiile guriga ma ii diidi karaa inuu iga kireeyo ama maiga saari karaa guriga sababtuna tahay sunta ee guriga kujirta?

Maya. Sida ku cad sharciyada Massachusetts iyo Sharciga Guryaha Cadaaladda ee Federaalka, milkiileyaasha guriga ma diidi KARAAN inay kaa kireeyaan ama kaa saaraan haddii aad carruur leedahay ama gurigu sunta leeyahay. Milkiilayaasha guryaha ayaa mas'uul ka ah hagaajinta khatarta rinjiga sunta ah ee gurigaaga.

Haddii aad u maleyneyso in milkiilaha guriga uu ku takooray, ka wac Xafiiska Boston ee Guryaha iyo Sinnaanta ee 617-635-2500 ama Guddiga Massachusetts ee ka hortagga takoorka 617-994-6000.

Milkiilahaygu wuxuu shaqo ka wadaa gurigayga. Qoyskaygu ma nabad baa?

Haddii aadan hubin in mulkiilahaagu uu si badqabta ah u shaqeynayo, wac Barnaamijka Ka Hortagga Summowga sunta ee Ilmaha ee Boston 617-534-5965.

Biyaha gurigayga maka nabad baa sunta?

- Khadka adeegga ee isku xira gurigaaga iyo biyaha Maamulka Kheyraadka Biyaha Massachusetts ayaa laga yaabaa inuu keydiyo sunta.
- Ogow haddii khadka adeegga gurigaaga laga sameeyey sunta adoo ka hubinaya khariidadda adeegga Guddiga Sumoowga ee Biyaha iyo Bulaacadaha Boston ee www.bwsc.org ama wacaya 617-989-7888.

